Deltagerinformation - Somalisk
Macluumaadka Ka-qaybgalaha

Cinwaanka mashruuca :
DD2-Xarunta deenishka ee istiraatijiyada daraasadda sonkorowga nooca 2aad
Waxaa ansixiyay Guddi Cilmiyeedka anshaxa ee Gobolka Koonfurta Danmark, Jornaal lamb. S-20100082.

Dadka lo rabo mashruuca cilmiyeedka ee heer qaran, waa kuwo cusub oo dhowaan laga helay cudurka macaanka noociisa 2 aad.

Mas ùulka mashruuca:
professor **Henning Beck-Nielsen.**

Maamulaha barnaamijka iyo lektorka:
MSc. Ph.D. **Jens Steen Nielsen**.

DD2-Xarunta deenishka ee istiraatijiyada daraasadda kaadi macaanka noociisa 2aad

Isbitaalka Jaamacadda
Kløvervænget 6, dabaqa 8aad
5000 Odense C

Goobta baarista ee deegaankaagu waa:

Soo koobid- macluumaadka ka qeyb galayaasha ee

Mashruuca:DD2-xarunta Deenishka ee istiraatiijiyadda baarista cudurka sonkorowga nooca 2aad .

Ka hor intaadan go'aansan,fadlan aqri dhammaan macluumaadkan ka qeyb-galaha:

Yaa ka qeyb gali kara
- Dadka ka weyn18 sano oo dhowaan laga helay cudurka macaanka nooca 2 aad.
(oo lagu ogaadey labadii sano ee la soo dhaafay gudohood).

Haddii aad tiraahdo HAA si aad uga qeyb qaadato, waxaad aqbalaysa in aad:
– marto baaritaan qaata 30 daqiiqo oo la xiriira cudurka kaadi macaanka nooca 2 aad oo ku lug leh in aad:

- Ka jawaabto su'aalo ku saabsan qaab nololeedka iyo xaalada cudurka sonkorowga ee qoyska.
- la cabiro wareegga sinta iyo dhexda, garaaca wadnaha xilliga nasashada, dhererka iyo miisaanka.
- Imaato balanta dhiig qaadista adiga oo sooman
- Keento kaadida subaxda hore.

Intaa waxa dheer, in adigu ogoshahay in:
- Mashruuca kaadi macaanka nooca 2 aad si qarsoodi ah u kaydiso una isticmaasho xogtaada oo ay ku jiraan dhiiggii iyo kaadidii lagaa qaaday si baaritaano la xiriira nooca 2aad ee sonkorowga loogu sameeyo.
- Xarunta nooca 2aad ee sonkorowga Laga yaabo in ay kula soo xiriirto oo ku saabsan mashruucyo cusub ee cudurka sonkorowga ah, marka ay ansixiyaan guddiga anshaxa daraasaadka. Mashruuca ka qeyb galkiisu waa ikhtiyaari.
- Xarunta nooca 2aad ee sonkorowga ka dib daraasadda, waxay isla markiiba kuu soo diraysa foom su'aaladeed, iyo mar labaadna labo, afar iyo lix sano ka dib. Waa ikhtiyaari in aad arrintaan ka jawaabto.

Ma waxaa jirta khatar la xiriirta ka qeyb-gal?
- Ma jirto wax khatar ah oo la xiriiro ka qayb qaadashadu.
- Halka gacanta laga qaaday dhiigga ayaa marar dhif ah oo waqti kooban,sababi kara bar madow ama infekshan.

Xuquuqdaada:
- Ka qayb-qaadashadu waa ikhtiyaari.
- Macluumaadkaaga ayaa si qarsoodi ah loo ilaalin.
- Ka qeyb-galka mashruucu ma saameyn doono daaweyntaada hadda ama mida mustaqbalka ah.
- Waad ka noqon kartaa mashruuca wakhti kasta adiga oo bixin wax sabab ah.

Maxaa laga filayaa mashruucu?

- Mashruucan ayaa la rajaynayaa in uu keeno aqoon cusub oo ku saabsan sida dhaxalka, waxyaabaha la xiriira qaab nololeedka iyo noocyo astaamaha ee sonkorowga nooca 2 aad loo adeegsan karo daaweynta shaqsi ahaaneed oo loogu tala galay nooca 2aad ee kaadi macaanka.

Macluumaadka Ka-qaybgalaha

Cinwaanka mashruuca:DD2- Xarunta deenishka ee istiraatijiyada daraasadda sonkorowga nooca 2aad .

Waxaan ku weydiin doonaa in aad ka qeybgashid daraasad mashruuc heer qaran ah ee nooca 2 aad kaadi macaanka oo ay fulinayso –DD2- Xarunta deenishka ee istiraatijiyada daraasadda sonkorowga nooca 2aad.

Kahor intaadan go'aan gaarin, fadlan si taxaddar leh oo dhameystiran u aqri macluumaadkan.Mar walba way kuu furan tahay inaad weydiiso su'aalo.

Ujeedada iyo sharaxaad kooban ee mashruuca

Ujeedada DD2 waa in la wanaajiyo daaweynta bukaanka qaba nooca 2aad ee sonkorowga iyo in lala socdo horumarka cudurka ee Danmark. Tan waxaa la samayn doonaa iyadoo loo marayo nidaamka diiwaangelinta ee deenishka iyo sameynta keyd- xogeed qaran oo la xiriira dhiigga iyo kaadida; sidoo kale loo yaqaan kaydka bayoolojiga.
Aasaasida keyd-xogeedka iyo kaydka bayoolijiga ayaa sidoo kale bixinaya fursad qaas ah oo lagu baarayo, haddii daaweynta loo waafajin karo qof ahaan bukaanka qaba nooca 2aad ee kaadi macaanka illaa heer ka weyn sidii hore.
Natiijooyinka waxaa lagu soo daabici doonaa joornaalada qaranka iyo kuwa caalamiga ah, kuwaas oo laga heli karo bartaan www.dd2.dk.

Waa hamiga xaruunta DD2 in ay ka qayb-qaataan mashruuca dhammaan dadka da'dooda ka weyn tahay18 sano oo cusub dhowaana laga helay nooca 2aad cudurka macaanka, kaas oo la ogaaday 2dii sano ee la soo dhaafay.

Daraasado cusub oo cilmi baaris ah ayaa la bilaabi karaa. Sidoo kale aqbalaada ka qeybgalka waxay cadeyneysaa in Xarunta DD2 ay kula soo xiriiri karto arrimaha ku saabsan daraasado cusub ee mustaqbalka ah.
Si kastaba ha noqotee, xaalad kasta oo jirto kuma qasbanid inaad ka qeybqaadato daraasadaha noocaas ah. Intaas waxaa sii dheer, daraasadaha mustaqbalka waa in ay ansaxiyaan Guddiga anshax Cilmiyeedka ee Gobolka Koonfurta Danmark ka hor intaanan kula soo xiriirin.

Kaydinta xogta iyo waxyaabaha bayoolojiga

Dhamaan xogtaada iyo sidoo kale saamiyada dhiigga iyo kaadida waxaa lagu calaamadeeyey sumad si aqoonsigaaga aan u soo muuqan. Qarinta aqoonsigaaga oo aan si fiican u muuqan, waxay xaqiijineysaa in aan lagu aqoonsan, goorta xogtaada iyo wixii baaritaan loo qaaday la keydinayo,marka la darsayo iyo la daabacayo. Qof kasta oo ka shaqeeya xogtaada, waxaa la hoos gelayaa sharciga xog qarinta iyo qawaaniinta Hay'adda Ilaalinta Xogta ee la xiriirta maaraynta macluumaadka shaqsiyadeed.

Daraasada DD2

Waa in aad tagto dhiig qaadis oo ka hor lagula yeesho wareeysi gaaban ama ka jawaabto foom su`aalo elektaroonig ah.

Dhiig qaadista waa in aad tagtaa adigo sooman. Sidaa si la mid ahna waa in aadan cunin cuno aan ka ahayn biyo laga bilabo ka hor 10^{ka} habeenimo. Intaa waxaa sii dheer,in aadan qaadan dawada xakamaynta sonkorta dhiigga inta aad sooman tahay. Dhiiggan la qaadayo guud ahaan waa ilaa 90 mililiitar. Ugu dambeyntii, waxaad horay u soo qaadaysa kaadida aroortii hore oo qiyaastii ah 10 mililiitar.

Inta lagu jiro wareysiga ama foomka su'aalaha elektiroonigga ah, adigu waa inaad ka jawaabtaa su'aalo ku saabsan xaaladahaaga guud ee caafimaad, caadooyinka jimicsigaaga iyo haddii cudurka sonkorow uu ka jiro qoyska dhexdiisa. Waxaa laga cabiri doona garaaca wadnaha,dhererka(haddii wareysiga),miisaanka iyo wareega sinta iyo dhexda. Sidoo kale, waxaan weydiineynaa inaad leedahay e-mail, maaddaama aan jeclaan lahayn inaan kuu soo dirno foom su'aalo elektiroonig ah ka dib marka daraasadda DD2 la dhammaystiro iyo mar kale in lagu soo diro laba, afar iyo lix sano ka dib. Waa ikhtiyaari in aad soo dirto e-maylkaaga oo aad ka jawaabto foomka su'aalaha xiga.

Darsid waxyaalaha bayoolojiga ah

Saamiyada dhiigga iyo kaadida waxaa loo diraya keyd bayooloji ah, halkaas oo lagu qaboojinayo illa heerka barafoobida laguna keydiyo, si loo darso xilli dambe. Baaritaanka wax jawaab ahna laga ma bixinayo. Sidaa darteed, ma jiraan natiijooyin deg-deg ah oo loo isticmaali karo daaweyntaada.
Dhiigagga la qaaday waxaa laga baari doonaa kala duwanaanshaha hidahe-raaca iyo astaamaha noocyada 2 ee cudurka sonkorowga. Baarista qaar ka mid waxaa lagu sameeyaa wadamo dibedda ah.
Halka haraaga dhiiga iyo kaadida ee ku haraykeydka bayoolojiga la isticmaali karo oo kaliya, hadii ay ogolaadaan Gudiga anshax cilmiyeedka ee Gobolka koonfurta Danmark iyo madasha latalinta aqoon yahanada ee DD2. Dhamaadka mashruuca DD2, dhammaan waxyaabaha ku hara keydka bayoolojiga waa la baabi'in.

Khatarta daraasadda

Wax khatar ah kama jirto daraasadda DD2. Si kastaba ha noqotee, marka la qaadayo saamiga dhiigga, waxaa dhici karta halis yar oo infekshan ah, kaas oo sababi kara cuncun ku kooban meesha dhiigga laga qaaday muddo dhowr maalmood ah. Intaa waxaa sii dheer, in dhiig qaadista xaalado dhif ah keento dhiigbax maxali ah oo muddo kooban sababi kara bar madow..

Burin/ laalis
Wakhti kasta waad la noqon kartaa ogolaanshahaaga oo sabab la áan ah, adigoo la xiriiraya Xarunta DD2. Haddii aadan doonayn inaad ka si mid ahaato ka qeyb qaadashda, wax cawaaqib ah uma lahan doonto daaweyntaada hadda ama mustaqbalkaba.

Soo celin
Wax magdhaw ah lama bixinayo oo la xiriira ka qeybgalka mashruuca.

Wax tarka tijaabada
Daraasad cusub ayaa muujineysa in nooca 2^{aad} ee cudurka sonkorowga loo qaybin karo dhowr qayb hoosaadyo, oo lagu sifayn karo, iyadoo la adeegsanayo darsida hidde-raaca, astaamaha cudurka kaadi macaanka noocisa ^{2aad} ee bayoolojiga cusub iyo daraasad waxyaabaha la xiriira qaab nololeedka. Wanaajinta sinfeynta nooca 2^{aad} sonkorowga, waxay daaweynta ka dhigi kartaa mid shaqsiyeed oo ka badan sida ay maanta tahay. Tani waxay horseedi doontaa yareynta tirada iyo xaddiga cudurada ay keeni ama cirib reebi karto nooca 2^{aad} ee sonkorowga, sidaasna kor loogu qaado tayada nolosha iyo fay wanaagga bukaanka shaqsi ahaantisa.

Macluumaadka ku saabsan xaaladaha dhaqaale iyo ka qeybgalayaasha mashruuca
Muddadii u dhexeysa 2018-2022, waxaa mashruuca DD2 lagu maalgeliyey deeq ka timid Novo Nordisk Foundation (40 milyan oo koron) iyadoo ku xigeenka fulinta **Kurt Espersen**, Gobolka Koonfurta Danmark u ahaa deeq qabtaha. Maamulka guud waxaa maareeynayaa guddi fulineed iyo madal talo bixin aqoon yahaneed, halka maaraynta maalinlaha ah uu ka dhacayo xarunta DD2 oo ku taal rugta cudurka kaadi macaanka Odense ee Isbitaalka Jaamacada Odense (fiiri barta ururka www.dd2.dk). Sidoo kale, waxa mashruuca DD2 si toos ah iyo si dadbanba u taageera shanta gobol.

Taariikh ahaan, waxaa mashruuca DD2 taageeray Golaha talo bixinta Istaraatiijiyadda darasaadka (40 milyan kr), Agaasinka Guud Caafimaadka (1 milyan), Ururka cudurka Sonkorowga (0,5 milyan), Novo Nordisk (1+ 12 kr), Gobolka Koonfurta Danmark. (1 kr. 1.6 milyan) iyo dhigaalka Novo Nordisk (9.6 milyan kr.).
Taariikhda hawl wadaagiyaasha waxaa laga daawan karaa bartaan www.dd2.dk.

Ha ahaado codsadayaasha, hawl wadaagyaasha ama maareeyayaasha mashruuca masuulka ka ah midkoodna ma laha wax dhaqaale ahaan la xiriira tabaruciyaasha.

Wada hawl galayaasha mashruuca DD2 muddada 2018-2022

1. Cusbitaalka Jaamacadda Aarhus oo soo bandhigay **Maaraynta Xogta**: Professor Henrik Toft Sørensen, MD, DMSc, Isbitaalka Jaamacadda Aarhus.
2. Isbitaalka Lillebælt, Vejle waxaa matalay Keydka bayoolojiga(**Biobanken)**: Maamulaha sheybaarka Ivan Brandslund, MD, DMSc, Vejle Hospital

Maareynta maalinlaha ah

Guddoomiyaha Madasha Latalinta aqoon yahaneed:
Professor **Henning Beck-Nielsen**, MD, DMSc, Isbitaalka Jaamacadda Odense.

Gudoomiyaha Gudiga fulinta:
Agaasimaha Xarunta Cudurka Sonkorowga Odense **Jan Erik Henriksen**, MD, PhD, ee Isbitaalka Jaamacadda ee Odense.

Madaxa Xarunta dhexe DD2:
lektor **Jens Steen Nielsen**, MSc, PhD, ee Isbitaalka Jaamacadda Odense.

Fursad cabasho

Waxaad ka muwaadhin ahaan xaq u leedahay fursad ku siinayso inaad hesho macluumaadkaaaga, iyadoo la raacayo qodobbada "Sharciga Maamulka Dadweynaha". Haddii natiijada ka qayb-galkaaga tijaabada qalad ama dhaawac kugu dhaco ka bukaan ahaan, waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama qaybta gar gaarka deg-degga ah.
Haddii aad rabto inaad ka cabato ama dacwooto arin ku saabsan daaweynta laga siiyey xaruunta mashruucan DD2, waa inaad cabasho u dirtaa Golaha Dacwadaha Bukaan-socodka, ka sii baar bartaan www.stpk.dk. Haddii cabashadu ay keento sabab lagu bixiyo magdhow, marka tani waxa lagu bixinaya sida waafaqsan sharciga deenishka.

Waxaan kaa codsaneynaa inaad aqriso xaashiyahan "Kahor intaadan go aansan – in aad noqonto qof tijaabo ah oo lagu darso mashruucan caafimaad ee cilmi baarista ah " (www.nvk.dk).

Had iyo jeer waa ay kuu furan tahay inaad kala soo xiriirto xarunta DD2 taleefanka ah 65 41 36 25 iyo emaylka ouh.dd2@rsyd.dk.

Mahadsanid

Maamulaha barnaamijka iyo lektorka Jens Steen Nielsen

DD2- Xarunta istiraatijiyada deenishka ee daraasadda sonkorowga nooca 2aad
Kløvervænget6, 8.sal
5000 Odense C